

Ma raadinaysaa dabool caafimaad oo jaban ama bilaash ah?



SIDA UU U SHAQEEYO

Barnaamijka OHP Standard waxa uu caymis caafimaad oo qiimihiisu jaban yahay siiyaa deganeyaasha Oregon ee:

- Aan haysan caymis daryeel caafimaad*
- Jira 19 sannadood ama ka weyn*
- Uur leh*
- Dhaqligoogu yar yahay*

Sababta oo ah ma jiraan ku-talagal ku filan in qof kasta lagu haqabtiro baahidiisa, waxay DHS abuuraysaa liis ah dadka raba inay weydiistaan OHP Standard. Waa inaad magacaaga galisid liiska sugitaanka inta lagu jiro 28-ka Bisha Koobaad ilaa 29-ka Bisha Labaad 2008.

DHS waxay si nasiib ah magacyo uga dooran doontaa liiska laga bilaabo Bisha Saddexaad. Haddii magacaaga la doorto, waxay DHS kuu soo diri doontaa foomka ama warqadda codsiga ee OHP Standard. Haddii aad codsatid oo lagu oggalaado, waxa lagu qori doonaa OHP Standard.

DHS waxay rabtaa inaad noqotid qof madax-banaan, oo caafimaad qaba isla markaana amaan ah. Qorshaha caafimaadka ee la yidhaahdo Oregon Health Plan waxa uu kaa gargaari karaa in taa laga dhigo suurogal.



BILAAB HAWSHA

Waxa jira saddex siyaabood oo lagu gali karo liiska sugitaanka:

INTERNETKA KU BUUXI CODSI.

Booqo rugta internetka ee liiska sugitaanka ee OHP Standard oo ku yaala www.oregon.gov/DHS/open ka dibna si elegtaroonig ah u gali warkaaga.

BOOSTA KU SOO DIR CODSI.

Buuxi warqadda codsiga sugitaanka OHP Standard. Waraaqaha codsiga waxa laga heli karaa xafiis kasta oo ah DHS ama AAA, waaxda caafimaadka ee degmada iyo badi cisbitaalada iyo xarumaha caafimaadka.

TELEEFONKA ISKU QOR.

Wac 800-699-9075 ama 503-378-7800 (TTY) Isniin ilaa Jimce, 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 galabnimo. Haddii aanad wici karin saacadaha la sheegay, qof kale ayaa kuu wici kara – waxa kaliya ee ay u baahan yihiin magacaaga, taariikh dhalasho iyo adrees ama cinwaan waraaqaha laguugu soo diro.

WAA WAX FUDUD, WAA CADAALAD, IS QOR LIISKA!

Liiska sugitaanku waxa uu furan yahay kaliya laga bilaabo 28-ka Bisha Koobaad ilaa 29-ka Bisha Labaad 2008.



OHP 3206 (Rev. 01/2008) – Somali



Warka sare waxa uu khuseeyaa kaliya OHP Standard. Barnaamijyada gargaarka caafimaadka ee kale, sida kuwa loogu talagalay haweenka uurka leh ama dadka ka yar 19 sannadood, waxay leeyihiin shuruudo u-banaanaan oo kale waana ay furan yihiin wakhti kasta. Si aad u ogaatid inuu kuu banaan yahay mid ka mid ah barnaamijyadaa, buuxi codsiga OHP. Codsiyada OHP waxa la heli karaa marka la waco 800-359-9517 ama waxa laga heli karaa xafiis kasta oo ah DHS.